

Ka dhigista wax barashada dugsiga sare kadib mid sidan ka jaban

Febraayo 16, 2023

Dawladda Alberta waxa ay qaadaysaa tallaabo ay ku wanaajinayso jabnaanta, wax kaga qabanayso sicir bararka oo ay waxbarashada kaga dhigayso mid uga sugnaansho badan oo uga saadaalin badan sida hadda ardayda dugsiga sare kadib ee Alberta.

Dhaqaalaha Alberta si xooggan baa uu u soo kabtay balse ardaydu waxa ay la dhibaataaysan yihiin la qabsiga lacagta korodhay ee nolosha. Dawladda Alberta waxa ka go'an xaqijinta in waxbarashada dugsiga sare kadib ay ahaato mid ay heli karaan isla markaana awoodaan dhammaan reer Alberta. Taasi waa sababta Waxbarashada Sare ay u siinayso ardayda dugsiga sare kadib taageerooyin jabnaan oo cusub, oo bartilmaameedsan.

Iyada oo qayb ka ah Miisaaniyadda 2023, dawladdu waxa ay qorshaynaysaa inay ku wanaajiso jabnaanta loogu talagalay ardayda dugsiga sare kadib iyada oo:

- Ku xaddidaysa korodhka waxbarashada deegaanka boqolkiiba laba hay'adda oo dhan 2024-25 iyo sanadada akaadeemiyadeed ee mustaqbalka.
- Yareynaysa qiimeyaasha dulsaarka ee saaran deymanka ardayda oo ka dhigaysa qiimaha aasaasiga ah, taas oo gacan ka geysan doonta yareynta kharashka amaahashada ee qaatayaasha deynta ardayda Alberta ee hadda iyo mustaqbalka.
- Labanlaabaysa muddada ogolaanshaha deynta bilaa dulsaarka ah ee ardayga oo hore u ahayd 6-bilood oo hadda ka dhigaysa 12 bilood si ardayda loo siiyo wakhti dheeraad ah oo ay ku raadsadaan shaqo faa'iido leh iyaga oo aan ka werwersaneyn kharash bixinta deynta ardayga.
- Kordhinaysa xuduudda Qorshaha Kaalmada Dib u Bixinta Kharashka oo hore u ahaa \$25,000 oo hadda ka dhigaysa \$40,000, si arday intan ka badani uga faa'iidi karaan barnaamijka.

Taas waxa dheer, dawladda Alberta waxa ay bixinaysaa maalgelin dheeraad ah si ay u kordhiso Deeqda Ardayga Alberta \$225 bishii arday kasta oo u qalma inta lagu gudo jiro sanad deymeedka 2022-23.

“Sicir bararka sarreeyaa waxa uu ka dhigay nolosha mid sidii hore uga qaalisan dhammaan reer Alberta, oo ay kamid yihiin ardayda dugsiga sare kadib. Tallaabooyinka cusub ee lagu dhawaaqay maanta waxa ay ka caawin doontaa dhammaan ardayda inay la tacaalaan kharashaadka sarreeya inta lagu gudo jiro wakhtiyadan adag.”

Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada Sare

Dawlada Alberta ayaa dhawaan ka bixisay xidhmada kaalmada sicir bararka ee ugu ballaaran Canada, oo leh taageerooyin muuqda kuwaasoo kaalmooyin dadka oo dhan ah iyo kuwo dad gaar ahba bixinaya. Tallaabooyinka maantu waxa ay xaqiijinayaan ardayda dugsiga sare kadib inay sidoo kale helaan taageerooyin jaban oo bartilmaameedsan.

“Tallaabooyinkan jabnaanta ee cusub ee ardaydu waxa ay shay dheeraad ah oo muhiim ah u yihiin Qorshahayaga Tallaabada Jabnaanta, waxana ay xoojisaa dedaalka aanu ugu jirno ardayda, iyo inaanu ka dhigno Alberta mid jaban.”

Mat Jones, Wasiirka Jabnaanta iyo Adeegyada

Wax ka badan 10,000 arday oo dakhli-hooseeya oo hela maalgelintan. Kordhinta maalgelinta ee Deeqda Ardayda Alberta waxa ay ka dhigan tahay ardayda u qalmaa inay imika helayaan illaa wadar ah \$475 bishii.

Maalgelintan bishii ee dheeraadka ah waxa ay noqon doontaa mid hore u bilaabatay, taas oo ka dhigan ardaydu inay heli doonaan \$225 bishii laga bilaabo bilawga sanad akaadeemiyadeedka 2022-23, iyada oo ah kharash bixin mar wada socota. Ardayda ka heli doona maalgelintan dheeraadka ah Deeqda Ardayda Alberta waxa ogaysiin doona Kaalmada Ardayda Alberta Maarso. Waxa ay sidoo kale ka heli doonaan maalgelin dheeraad ah kaalmada ardayga inta lagu gudo jiro wakhtigan.

"Ku dhawaaqitaanka maantu waxa uu hoosta ka xariiqayaa dhaqangelinta codsiga muddada dheer ee ka imanaya hogaamiyeyaasha ardayda ee ku saabsan jabnaanta. Aniga oo ku hadlaya afka ardayda Alberta, waa arrin wanaagsan inaan arko dedaalada la kordhiyey ee lagu xaqiijinayo in waxbarashada dugsiga sare kadib ay tahay mid uga helitaan fudud oo uga jaban sidii hore dhammaan ardayda.”

Samantha Scott, Guddiga Ardayda Jaamacadda Alberta (CAUS), guddoomiye

Ardaydu waxa ay la dhibaataysnaayeen kharashaadka kordhaya ee xaadiritaanka waxbarashada dugsiga sare kadib. Waxa aanu ku faraxsanahay inaanu aragno codadka ardayda oo la maqlayo iyo tallaabooyin la qaadayo si wax looga qabto jabnaanta.”

*Janmejay Rao, Guddiga u Doodista Gobol ee Qallinjebiyeyaasha Alberta (AbGPAC),
guddoomiye ku xigeen*

Dawladda Alberta waxa ka go'an xaqiijinta in waxbarashada dugsiga sare kadib ay ahaato mid la heli karo isla markaana jaban. Tallaabooyinkani waxa ay fududeyn doonaan saameynta sicir bararka si ardayda waxbarashada dugsiga sare kadib ay diiradda u saari karaan waxbarashadooda oo uu uga yaraan karo werwerka ay ka qabaan bixinta biilasha. Waxa ay sidoo kale u fududeyn doonaan qaatayaasha deynta ardayda inay bixiyaan deyntooda si wax ku ool ahna ugu wareegaan shaqada.

Macluumaadka la xidhiidha

[Alberta 2030: Dhisidda Xirfadaha Shaqada](#)

Su'aalaha saxaafadda

Sam Blackett

Sam.Blackett@gov.ab.ca

587-589-6048

Afhayeenka, Waxbarashada Sare